

Qaabee Lake City Community Center! Dib u eeg Naqshada oo Bixi Jawaab celin

Waaxda Baarkinnada iyo Madadaalada Seattle (Seattle Parks and Recreation, SPR) ayaa iska kaashanaya Waaxda Derisnimooyinka (Department of Neighborhoods, DON) si ay u bixiyaan fursado kala duwan oo ay bulshada uga qaybqaadato Lake City Community Center ee mustaqbalka. Kusoobiir munaasabadahan soo socda si aad wax badan uga ogaato dib-u-habaynta, ula wadaagto fikradaada, uguna shaqeyso [SPR] iyo kooxda naqshadeeyayaasha si aad uga qeyb qaadato qaabeynta Cusub ee Lake City Community Center!

Khamiis kasta, Agoosto 14, 21, iyo 28 –Lake City Farmers Market (Suuqa Beeraleyda ee Lake City)

- Waqti: 3:00 galabnimo – 7:00 fiidnimo.
- Goobta: Albert Davis Park, 12526 27th Ave NE

Jimce, Agoosto 15 – Munaasabadda Isku Imaanshaha Jalaatada

- Waqti: 4:30 galabnimo – 6:30 fiidnimo.
- Goobta: Akin Building, 12360 Lake City Way NE

Munaasabadahani waxay siin doonaan fursad lagu la kulmo kooxda naqshadeynta lana bixiyo talooyin ku saabsan ikhtiyaarka naqshadaha xarunta bulshada, kuwaasoo lagu saleeyay jawaabcelintii aan helnay sannadkii hore intii lagu jiray marxaladdii qiimeynta baahiyaha.

Dadaalladan wacyigelin ah waxay diiradda saari doonaan naqshadaynta xarunta bulshada ee laba dabaq ah. Hadafkeennu waa inaan dhageysanno bulshada oo aan uruurinno talooyin saameyn doona qaabka naqshadeynta. Waxaan sidoo kale ku hawlgelaynaa sahan khadka tooska ah oo lagu sii dayn doono luqado kala duwan (Amharic, Somali, Spanish, Tigrinya, Traditional Chinese, Ukrainian, iyo Vietnamese) laga bilaabo Agoosto 14.

Waaxda Seattle ee Parks and Recreation iyo the Seattle Office of Housing (OH) waxay ku faraxsan yihiin inay helaan [Mercy Housing oo ah hormuudka dib-u-habaynta mashruuca](#) Lake City Community Center. Horumarinta Lake City Community Center waxay soo bandhigaysaa fursad gaar ah oo lagu mideynayo xarun cusub oo bulsho iyo 113 guri kirayso jaban ah, dhammaan ku yaalla meel hal goob ah oo ku dhow Lake City Branch Library iyo Albert Davis Park. Tani waa iskaashigii horumarineed ee ugu horreeyay ee u dhexeeya OH iyo SPR, taasoo u suurta gelinaysa Magaalada inay isku darto kheyraadka si loo abuuro guryo la awoodi karo oo si weyn loogu baahan yahay, oo laga dhisayo dusha xarun bulsho oo cusub. SPR waxay sii wadi doontaa inay lahaato oo ay hawlalisoo Lake City Community Center, 12531 28th Avenue NE., marka dib loo dhiso. Xaruntu waxay sii ahaan doontaa qayb muhiim ah oo ka tirsan xaafadda Lake City, iyadoo u adeegaysa sidii xarun loogu talagalay hawlaha bulshada una midaynaysa dadka da'da kala duwan leh, kartida kala duwan leh, iyo dhaqamada kala duwan.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan labada mashruuc fadlan booqo <https://www.seattle.gov/parks/about-us/projects/lake-city-community-center-redevelopment> ama kala xiriir Asmita Poudel barta Asmita.poudel@seattle.gov.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Office of Housing fadlan booqo <https://www.seattle.gov/housing/programs-and-initiatives/lake-city-community-center-redevelopment#rfqlakecitycommunitycenterredevelopment.xml>